Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo

| JAMHUURIYADDA | | SOMALILAND |
|---|---|---|

# FAAFINTA RASMIGA AH

| SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE | ألنَّشرة الرَّسمية لجمهورية صوماليلاند |
|---|---|


**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA**

***E-mail: Faafintagaryaqaanka@gmail.com***

| Sanadka: 6aad | Cadadka: 6aad ee June | Taariikh: 01/07/2017 |
|---|---|---|

**QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.**

**RUKUNKA (Subscription):**

*QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.*


**TUSMADA CADADKA**


**QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANIYADDA QARANKA:**

1) **SOOMA BIXIN**

**QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE:**

| | |
|---|---|
| 2) Magacaabid Guddida Soo Magacaabaysa Xubanaha Culimada 05/06/2017 | 312 |
| 3) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0791/062017 Beddel | 313 |
| 4) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0785/052017 Magacaabid | 314 |
| 5) **Xil-ka Qaadis** 05/06/2017 | 315 |
| 6) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0792/062017 Beddel | 317 |
| 7) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0793/062017 Beddel | 318 |
| 8) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0794/062017 Magacaabid | 319 |

| | |
|---|---|
| 9) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0795/062017 Beddel | 320 |
| 10) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0796/062017 Magacaabid | 322 |
| 11) **Xil-ka Qaadis** 05/06/2017 | 323 |
| 12) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0797/062017 Magacaabid | 324 |
| 13) **Xil-ka Qaadis** 05/06/2017 | 325 |
| 14) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0798/062017 Magacaabid | 327 |
| 15) **Xil-ka Qaadis** 05/06/2017 | 328 |
| 16) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0799/062017 Beddel | 329 |
| 17) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0800/062017 Beddel | 330 |
| 18) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0801/062017 Magacaabid | 332 |
| 19) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0802/062017 Magacaabid | 333 |
| 20) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0803/062017 Magacaabid | 334 |
| 21) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0804/062017 Beddel | 336 |
| 22) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0806/062017 Magacaabid | 337 |
| 23) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0807/062017 Beddel | 338 |
| 24) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0808/062017 Magacaabid | 340 |
| 25) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0809/062017 Magacaabid | 341 |
| 26) **Xil-ka Qaadis** 05/06/2017 | 342 |
| 27) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0810/062017 Magacaabid | 344 |
| **QAYBTA SADEXAAD:** XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIIJOOYINKA DOORASHOOYINKA & | |


GARYADAANKA GUUD EE QARANKA JSL

| | |
|---|---|
| **BARNAAMIJYADA DAWLADA:** | |
| 28) **SOOMA BIXIN** | |
| **QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:** | |
| 29) **SOOMA BIXIN** | |
| ***QAYBTA SHANAAD*: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:** | |
| 30) Diiwaan Gelin Shirikada Madar Fuel Station<br>**Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 346 |
| 31) Diiwaan Gelin Shirikada Majestic Cleaning Service<br>**Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 347 |
| 32) Diiwaan Gelin Shirikada Global Procerement & Trading Solution<br>**Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 349 |
| 33) Diiwaan Gelin Caweer Motor Sales & Rent<br>**Xafiiska Xeer illaalinta Guud** | 350 |

# QAYBTA LABAAD:

## XEER MADAXWEYNE:

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/WMBHB/4827/062017** **DATE…05/06/17**

| | | |
|---|---|---|
| Ku: | Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta | (Golaha Xukuumadda) |
| Ku: | Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga iyo khayraadka Badda | (Golaha Xukuumadda) |
| Ku: | Xildhibaan, Maxamuud Xareed Rooble | (Golaha Guurtida) |
| Ku: | Xildhibaan, Sheekh Cumar Sh. Axmed Furre | (Golaha Guurtida) |

Ujeeddo: Magacaabid Guddida Soo Magacaabaysa Xubnaha Culimada

Mudanayaal,

Aniga oo ka duulaya Qoddobka 119aad, Faqraddiisa 1aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland ee u dhigan sidan "Xubnaha Guddida Culimada waxaa soo magacaabaya guddi laga soo cayimo Golaha Xukuumadda iyo Golaha Guurtida oo is-tiro le'eg; waxaana oggolaanaya Golaha guurtida". Sidaa darted, waxaan idiin xilsaaray in aad soo xushaan, isla markaana soo magacawdaan Guddida Culimada Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan idinka rajaynayaa in aad xil weyn iska saari doontaan soo magacaabista xubnaha Guddida Culimada, madaama sida uu faahfaahinayo Qodobka 115aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, ay muhiimad balaadhan u leeyihiin dhismaha qaranka.

Sidoo kale Mudanayaal, Waxaan idinka rajaynayaa in aad muddo gaaban oo deg-deg ah ku soo magacaabi doontaan, iiguna soo gudbin doontaan Xubnaha Guddida Culimada, idinka oo tixraacaya qodobbadan dastuuriga ah:

1. Qodobka 116aad (Tirada Guddida iyo Muddada Xilka)
2. Qodobka 117aad (Shuruudaha Xubnaha)
3. Qodobka 118aad (Waxyaabaha Ka Reebban Xubanaha)

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XERM/249-4828/062017** **DATE ……05/06/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr:0791/062017

## Beddel

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

| | |
|---|---|
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta ee Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Mustafe Faarax Abraar, laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XILQ/249/1-4829/062017** **DATE…05/06/17**

**Ku**: **Mudane, Maxamuud Sheekh Cabdillaahi Cige,**
**Wasiirkii Hore ee Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta Hargeysa**

Ujeeddo: **Xilka Qaadis**

Mudane,

Waxa aan aad kuugu mahadinaya muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darted, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta ee Jamhuuriyada Somaliland.

Haddaba, waxaan in kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Mustafe Faarax Abraar, oo aan xilka Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaadhsiinta ee Jamhuuriyada Somaliland u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4830/062017** **DATE…05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0792/062017

# Beddel

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyay: | Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo magacaabidda jagada Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta ee Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Yuusuf Cismaan Garas, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4831/062017** **DATE ......05/06/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr:0793/062017

## Beddel

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo magacaabidda jagada Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Gaashaandhigga ee Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Cabdiraxmaan Axmed Ismaaciil, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Gaashaandhigga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4832/062017** **DATE…05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0794/062017

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyay: | Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga ee Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |

| | |
|---|---|
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cabdillaahi Aw Aadan Raabi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XERM/249-4833/062017** **DATE ……04/06/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr:0795/062017

## Beddel

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo magacaabidda jagada Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Warshadaha ee Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cabdisalaan Maxamed Xasan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Warshadaha ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XERM/249-4835/062017** **DATE…05/06/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr:0796/062017

# Magacaabid

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**<u>Wuxuu go'aansaday</u>**

In Mudane, Xasan Xuseen Nuur Geelle, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XILQ/249/1-4834/062017** **DATE…05/06/17**

Ku: Mudane, Xasan Daahir Dhimbiil,
Wasiir Ku-xigeenkii Hore ee Wasaaradda Caafimaadka Hargeysa

Og: Wasiirka Wasaarada Caafimaadka

Ujeeddo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan aad kuugu mahadinaya muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Xasan Xuseen Nuur Geelle, oo aan xilka Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyada Somaliland u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka, oo ay warqadani ogeysiin ugu socoto, la farayaa in uu labada masuul u kala wreejiyo xilka Wasiir Ku- xigeenka Wasaaradda Caafimaadka ee Jamhuuriyadda Somaliland

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4836/062017** **DATE…05/06/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr:0797/062017

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Duulista Hawada ee Jamhuuriyadda Somaliland; |

| | |
|---|---|
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**<u>Wuxuu go'aansaday</u>**

In Mudane, Axmed Cali Baynax, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Duulista Hawada ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## <u>THE PRESIDENT</u>

**JSL/M/XILQ/249/1-4837/062017** **DATE…05/06/17**

Ku: Mudane, Axmed Nuur Faahiye,
Wasiiru-dawlihii Hore ee Wasaaradda Duulista Hawada Hargeysa

Og: Wasiirka Wasaarada Duulista Hawada

Ujeeddo: <u>Xil-ka Qaadis</u>

Mudane,

Waxaan aad kuugu mahadinaya muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Duulista Hawada ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Axmed Cali Baynax, oo aan xilka Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Duulista Hawada ee Jamhuuriyada Somaliland u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Wasiirka Wasaaradda Duulista Hawada, oo ay warqadani ogeysiin ugu socoto, la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka wasiiru-dawlaha Wasaaradda Duulista Hawada ee Jamhuuriyadda Somaliland

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4838/062017** **DATE...05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr:0798/062017

# Magacaabid

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (Kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha, Cilmi Baadhista iyo Technology-yadda ee Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cabdikariim Xuseen Siciid, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha, Cilmi Baadhista iyo Technology-yadda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XILQ/249/1-4839/062017** **DATE...05/06/17**

Ku: Mudane, Maxamed Cali Aadan,
Agaasimihii Hore ee Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha, Cilmi Baadhista iyo Technology-yadda Hargeysa

Og: Wasiirka Wasaarada Xidhiidhka Goleyaasha, Cilmi Baadhista iyo Technology-yadda Hargeysa

Ujeeddo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan aad kuugu mahadinayaa muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha, Cilmi baadhista iyo Technology-yadda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Cabdikariim Xuseen Siciid, oo xilkaa isaga ah u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Wasiirka Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha, Cilmi baadhista iyo Technology-yadda, oo ay warqadani ogeysiin ugu socoto, la farayaa in uu labada masuul u kala wareejiyo xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha, Cilmi baadhista iyo Technology-yadda ee Jamhuuriyadda Somaliland

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
<u>Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland</u>

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XERM/249-4840/062017** **DATE ......04/06/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr:0799/062017

## Beddel

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo magacaabidda jagada Wasiir

| | |
|---|---|
| | ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Axmed Xaashi Cabdi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XERM/249-4841/062017** **DATE ......04/06/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr:0800/062017

## Beddel

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyey: | Ahmiyadda weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo magacaabidda jagada Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Madaxtooyada ee Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku Qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu go'aansaday**

In Mudane, Cali Axmed Maxamed (Dhegoole), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Madaxtooyada ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-4842/062017 DATE...05/06/17

GARYADAASHA GUUD EE QARANKA JSL

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0801/062017

# Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad faqradiisa 3aad xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyay: | Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga ee Jamhuuriyada Soomaliland; |
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Jamaal Cabdillaahi Maxamed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gaashaandhigga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriya[…]naliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4843/062017** **DATE…05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0802/062017

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Arkay: | Qodobka 48aad een Xeerka Nidaamka Garsoorka; |
| Markuu Aqoonsaday: | Baahida loo qabo magacaabida jagada Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Qaranka; |
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Xuseen Maxamed Jaamac (Balal), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**
**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XERM/249-4844/062017** **DATE...05/06/17**

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0803/062017

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad faqradiisa 3aad xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Wakaalada Beeyada iyo Xabkuhu ee Jamhuuriyada Somaaliland u leedahay Dhismaha iyo Horumarinta Qaranka;

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo magacaabida jagada Maareeyaha Wakaalada Beeyada iyo Xabkaha ee Jamhuuriyada Soomaliland; |
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Cabdillaahi Maxamed Jaamac (Caray), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Wakaalada Beeyaha iyo Xabkaha ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/DM/249-4845/062017** **DATE…05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0804/062017

# Beddel

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyay: | Ahmiyadda Weyn ay Wasaaraduhu u leedahay Dalka iyo Dhismaha Qaranka; |
| Markuu La Tashada: | Masuuliyiinta ay arrintani khusayso; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo in isku beddel lagu sameeyo jagooyinkan hoos ku xusan; |
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku qancay: | In ay hanan karto xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu go'aansaday in laga bilaabo taariikhda xeerkan**

In Mudane, Axmed Aaden Ismaaciil (keyse), uu ahaado Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta ee Jamhuuriada Somaliland.

In Mudane, Keysar Cabdillaahi Maxamed, uu ahaado Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah ee Jamhuuriada Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4847/062017** **DATE…05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0806/062017

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad faqradiisa 3aad xarafka (r) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |
| Markuu Tixgeliyay: | Ahmiyadda ay Wakiilada Somaaliland u fadhiya Dalalka dibaddu u leeyihiin Dhismaha Qaranka; |
| Markuu Arkay: | In baahi loo qabo buuxinta jagada Wakiilka Jamhuuriyada Soomaliland u fadhiya Dalalka Cumaan iyo Kuwait; |
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |

Markuu Ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Salaan Xasan Cabdulle Warsame, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya dalalka Cumaan iyo Kuwait.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4848/062017** **DATE…05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0807/062017

## Beddel

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Gudoomiyayaasha Goboladu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada Gudoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyada Soomaliland;

Markuu ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Axmed Diiriye Cabdilaahi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XILQ/249/1-4852/062017** **DATE…05/06/17**

Ku: Mudane, Farxaan Xasan Cabdi,
Gudoomiyihii Hore ee Gobolka Daad-madheedh Oodwayne

Og: Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha Hargeysa

Ujeedo: Xil-ka Qaadis

Mudane,

Waxaan aad kuugu mahadinayaa muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darted, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Gudoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyada Somaliland.

Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Axmed Diiriye Cabdilaahi, oo aan xilka Gudoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyada Somaliland u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Wasiirka wasaaradda Arrimaha Gudaha, oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto, la farayaa inuu labada masuul u kala wareejiyo xilka Guddoomiyaha Gobolka Daad-madhedh ee Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4849/062017** **DATE…05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0808/062017

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Guddoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsanday: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Awdalee Jamhuuriyada Soomaliland;

| | |
|---|---|
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Cabdi Nuur Sugaal, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiye ku-xigeenka Gobolka Awdalee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

**JSL/M/XERM/249-4850/062017** **DATE…05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0809/062017

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland; |

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Guddoomiyeyaasha Gobolladu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsanday: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Saraar ee Jamhuuriyada Soomaliland;

Markuu ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Nuur Qaasin Qodax, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Gudoomiye ku-xigeenka Gobolka Saraar ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XILQ/249/1-4851/062017** **DATE...05/06/17**

Ku: Mudane, Ibraahim Jaamac Maxamed,
Gudoomiye Ku-xigeenkii Hore ee Gobolka Saraar — Caynabo

Og: Gudoomiyaha Gobolka Saraar — Caynabo

Ujeedo: <u>Xil-ka Qaadis</u>

Mudane,

Waxaan aad kuugu mahadinayaa muddadii aynu wada shaqaynaynay. Xilalka Qaranka ayay dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darted, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Gudoomiye ku-xigeenka Gobolka Saraar ee Jamhuuriyada Somaliland.

Haddaba waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Nuur Qaasin Qodax, oo aan xilka Gudoomiye ku-xigeenka Gobolka Saraar ee Jamhuuriyada Somaliland u magacaabay.

Sidoo kale, waxaa Gudoomiyaha Gobolka Saraar, oo ay warqadani ogaysiin ugu socoto, la farayaa inuu labada masuul u kala wareejiyo xilka Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Saraar ee Jamhuuriyada Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

**JSL/M/XERM/249-4853/062017** **DATE...05/06/17**

## XEER MADAXWEYNE Lr: 0810/062017

## Magacaabid

### Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad faqradiisa 3aad xarafka (j) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Guddida Maamul-wanaagga iyo La Dagaalanka Musuq-maasuqa u leeyihiin Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta xubinta bannaan ee Guddida Maamul-wanaaga iyo La-dagaallanka Musuq-maasuqa;

| | |
|---|---|
| Markuu ka Fiirsaday: | Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo; |
| Markuu Ku qancay: | In uu hanan karo xilkan loo magacaabay; |

**Wuxuu Go'aansaday**

In Mudane, Dayib Aadan Xaaji Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado xubin ka tirsan Guddida Maamul-wanaagga iyo La-dagaallanka Musuq-maasuqa ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## QAYBTA SHANAAD:

## AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/211/2017. 21/06/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, MADAR FUEL STATION.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer

N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilaha Shirkaddu ay saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliye.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **MADAR FUEL STATION, Astaanteeduna tahay: -** (Magaca shirkada), shaqadeeduna tahay Iibinta Shidaalka (Wholesaler), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/06/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/212/2017. 21/06/2017

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, MAJESTIC CLEANING SERVICES, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad(2)(a) Somaliland Compony Law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliye.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan yahay shirkada magaceedu yahay **MAJESTIC CLEANING SERVICES, Astaanteeduna tahay: -** (Iskoobe Magaca Shirkadu ku dhinaca yaalo), shaqadeeduna tahay Bixinta Adeega nadaafadda (Cleaning Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/06/2017.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL.**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/213/2017. 21/06/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargeysa.

## Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha.

**Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, GLOBAL PROCUREMENT & TRADING SOLUTIONS, Oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad(2)(a) Somaliland Compony Law.

**Markuu Arkay: -** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

**Markuu arkay: -** Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

**Wuxuu Diiwan Geliyey.Y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **GLOBAL PROCUREMENT & TRADING SOLUTION, Astaanteeduna tahay: -** (Magaca oo isku jira isna hoos yaala iyo Awr), shaqadeeduna tahay Saad Siinta (Logistics and Procurement), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/06/2017

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD JSL

XIG/JSL/214/2017. 21/06/2017

Ku: Cidda Ay Khuseyso. Hargaysa

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

**Markuu arkay: -** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

| | |
|---|---|
| | Xafiiska xeer ilaalinta guud in ay Diiwaangeliso Shirikadaha. |
| **Markuu arkay: -** | Xeerka Shirkadda magaceedu yahay, CAWEER MOTOR SALES & RENT, Oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad(2)(a) Somaliland Compony Law. |
| **Markuu Arkay: -** | In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland. |
| **Markuu arkay: -** | Saxeexa saamiilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha. |

**Wuxuu Diiwan Geliyey.y**

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay shirkada magaceedu yahay **CAWEER MOTOR SALES & RENT Astaanteeduna tahay: -** (Magaca oo isku jira xuruufta ugu horeysaa sida CMS), shaqadeeduna tahay Iibinta iyo Kireynta Baabuurta (Local Sales and Rents) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/06/2017.

Allaa Mahad Leh.

**(Xasan Axmed Aadan)**

**Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL**